

Magaca Dugsiga:

Cinwaanka Dugsiga:

TAARIKHDA :

\_\_\_\_\_Qaaliga ah:

Iyada oo lagu saleynayo jawaabahaaga Xog ururinta Luuqadda Guriga ee la buuxiyey xilligii diiwaangelinta iyo natiijooyinka wareysiga shaqsiyeed, ilmahaaga, \_\_\_\_\_, waxaa la imtixaanay marka ay ahayd \_\_\_\_ [DATE] \_\_\_\_\_iyada oo la adeegsanayo Imtixaanka Aqoonsiga Gobolka New York ee Bartaha Luuqadda Ingiriiska (NYSITELL). Natiijooyinka ee NYSITELL waxay go'aamiyaan heerkiisa ama heerkeeda si fiican u aqoonidda Ingiriiska iyo u-qalmidda helitaanka adeegyada Bartaha Luuqadda Ingiriiska (ELL). Ilmahaaga wuxuu ka keenay heerka \_\_\_\_\_NYSITELL (eeg sharaxaadda hoos), oo xaq u siinaysa asaga ama iyada in ay ku helaan adeegyada Bartaha Luuqadda Ingiriiska(ELL) ee barnaamijka Waxbarashada Luuqadaha Badan, ama Barnaamijka Ingiriiska Sida Luuqad Cusub.

Sax Saar <input checked="" type="checkbox"/> heerka	Heerka	haraxaadda Heerka Si Fiican u Aqoonidda Luuqadda Ingiriiska
<input type="checkbox"/>	<b>Gelitaanka (Bilow)</b>	Ardayga wuxuu aad ugu tiirsan yahay taageero iyo qaab-dhismeed lagu horumarinayo xirfadihiisa ama xirfadaheeda luuqadda tacliinta walina kama soo bixin dalabyada luuqadeed ee loogu baahan yahay in lagu soo bandhigo si fiican u aqoonidda luuqadda Ingiriiska dulucyada hadalka tacliineed ee kala duwan ee gudaha heerka fasalkan.
<input type="checkbox"/>	<b>Ka-sookicid(Heer Hoose Dhexe)</b>	Ardayga wuxuu xoogaa ku tiirsan yahay taageero iyo qaab-dhismeed lagu horumarinayo xirfadihiisa ama xirfadaheeda luuqadda tacliinta walina kama soo bixin dalabyada luuqadeed ee loogu baahan yahay in lagu soo bandhigo si fiican u aqoonidda luuqadda Ingiriiska dulucyada hadalka tacliineed ee kala duwan ee gudaha heerka fasalkan.
<input type="checkbox"/>	<b>Isbeddelaya (Dhexe)</b>	Ardayga wuxuu ka muujinayaa xoogaa madax-bannaani ah horumarinta xirfadihiisa ama xirfadaheeda luuqadda tacliinta, balse wali kama soo bixin dalabyada luuqadeed ee loogu baahan yahay in lagu soo bandhigo si fiican u aqoonidda luuqadda Ingiriiska dulucyada hadalka tacliineed ee kala duwan ee gudaha heerka fasalkan.
<input type="checkbox"/>	<b>Balbalaarin (Horumarsan)</b>	Ardayga wuxuu ka muujinayaa madax-bannaani badan ee ah horumarinta xirfadihiisa ama xirfadaheeda luuqadda tacliinta wuxuuna ku dhow yahaydalabyada luuqadeed ee loogu baahan yahay in lagu soo bandhigo si fiican u aqoonidda luuqadda Ingiriiska dulucyada hadalka tacliineed ee kala duwan ee gudaha heerka fasalkan.

**Waa muhiim in aad ka soo qaybgasho HANUUNINTA WAALIDKA sidaas awgeed waxaa wax ka baran kartaa barnaamijyada Bartaha Luuqadda Ingiriiska ee kala duwan iyo adeegyada loo heli karo ilmahaaga.**

Gobolka New York, dugsiyada waxaa laga doonayaa in ay qabtaan hanuunin loogu talagalay qoysaska ardayda ELLs ee dhowaan la qoray si loogu wargeliyo waalidiinta iyo mas'uuliyiinta wixii ku saabsan barnaamijyada ELL ee kala duwan ee laga heli karo dugsiyadooda ama degmadooda. Hanuuninta, waxaad ku helayaa macluumaad iyo qalab ku qoran afkaaga hooyo oo ku saabsan barnaamijyada ELL waxaadna awoodaysaa in aad wayddiiso su'aalo ku saabsan adeegyada ELL, adiga oo gargaar ka helayo turjumaan, haddii loo baahdo.Dhammaadka hanuuninta, waxaad buuxinaysaa Liisto-hubineedda Hanuuninta Waalidka ELL si aad u xaqiijiso in aad haysato macluumaadka loogu baahan yahay si aad u gaarto go'aanka ugu dambeeya ee khuseeya adeegyada uu ilmahaaga helayo.Macluumaadkan waxaa laguugu diyaarinayaa afkaaga hooyo.

HANUUNINTA WAALIDKA waxaa la qabanayaa \_\_\_\_\_[Date]\_\_\_\_\_saacadu marka ay tahay \_\_\_\_\_[Time]\_\_\_\_\_waxaana lagu qabanayaa goobtan soo socota:

[Address]

Fadlan waqti hore imaaw si aan u hubsano in aan waqtigii loogu talagalay bilowno. Haddii aadan ka soo qaybgali Karin hanuunintan, fadlan wac \_\_\_\_\_adiga oo ka wacaya \_\_\_\_\_si aad u jadwaleysato ballan aad kaga munaaqasheyso barnaamijyada ELL ee loo heli karo ilmahaaga. Waxaanu ugu rajaynaynaa sannad dugsiyeed guulaysta ilmahaaga dugsiyeenna. Hadaad qabto wax su'aalo ah ee khuseeya barnaamijka ilmahaaga, fadlan la xiriir \_\_\_\_\_adiga oo ka wacaya \_\_\_\_\_.

Sida uqabo qodobka 154-2.3(b), waxaad codsan kartaa dib u imtixaamida go'aamintaan ee gudaha 45 maalin dugsi. Haddii aad jeclaan laheyd in degmada qaado eegida labaad ee aqoonsiga canugaaga, fadlan ugu soo gudbi codsi qoran dugsiyaga 45 maalin dugsi gudaheed.

Daacadnimo,

Calaamey halkan haddii hanuuninta ay dhaceeyso xilliga diiwaangelinta.

**SCHOOL MUST MAINTAIN COPY IN STUDENT'S CUMULATIVE RECORD**